# Qeybta 504 iyo Ardayda Itaalka Darran

Arday kasta oo qaba itaal darri waxaa laga badbaadiyaa takoorka sida hoos timaado sharciga federaalka—**Qeybta 504** Sharciga Dayactirka (Rehabilitation Act) 1973. Sharcigaan wuxuu mamnuucay *takoorka ku saleysan itaal darrida xagga* barnaamij kasta ama hawl kasta oo maal gelin ka hesha dawaladda federaalka. Dhamaan dugsiyada dadweynaha gobolka Washington waa in ay u hoggaansamaan sharcigaan federaalka.

Qeybta 504 waxay rabtaa in dugsiyada dadweynaha ay "waxbarashada dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan ah" (FAPE) siiyaan arday kasta oo itaal darran - iyadoo aan la fiirinin sida ay u darran tahay itaal darrida. Sida hoos timaado Qeybta 504, dugsiyada waa in ay ardayda itaalka darran siiyaan fududeyn, kaalmo, iyo adeegyada ay u baahan yahiin si **ay ula xariiraan iyo si ay uga fa'iideystaan waxbarashada sida asxaabtooda.**

## Maxay tahay Itaal Darrida Sida Hoos Timaado Qeybta 504?

Qeybta 504 waxay itaal darrida ku sifeysaa in ay tahay itaal darrida jirka ama madaxa taasoo *si muuqata u soo koobta* hal ama ka *badan hawlaha nolosha.* Sifeyntaan itaal darrida waa in loo tarjumo si balaaran.

> ***Hawlaha waaweyn ee nolosha*** waa hawlaha muhiimka u ah nolol maalmeedka dadka. Daryeelka qofka, hawlaha gacanta laga qabto, socodka, aragtida, maqalka, hadalka, neefsiga, barashada, shaqada, cunidda, hurdada, istaagga, roganka, akhriska, isku mashquulinta, fakarka, iyo isgaarsiinta waa qaar ka mid ah tusaalooyinka hawlaha waaweyn ee nolosha. Hawlaha waaweyn ee nolosha waxaa ka mid ah hawlaha waaweyn ee uu jirka qabto, sida hawlaha habka cunta shiidka, caloosha, kaadi haynta, maskaxda, xiddidada dhiigga, dhalmada, xididdada, ama habka neefsiga.
>
> ***Si muuqato loo soo koobay*** waa in loo tarjamo si balaaran. Itaal darrida ardayga uma baahna in ay hor istaagto, ama in ay si darran ama si muuqata u xayirto, hawsha nolosha si ay u noqoto mid si muuqato u soo koobta.

**Qiimeey Itaal darrida Aan La Yareynin**

Lama tixgelin karo talaabadaha yareynta marka la qiimeynaayo haddii ardayga uu qabo *naafonimo soo koobta itaal darrida ama haddii kale*. Talaabooyinka yareynta waxaa ka mid ah daweynta, qalabka la geliyo jirka, qalabka taakuleynta, ama dabeecadaha la barto ama la qabsiga baddalaadda xididdada uu ardayga isticmaalo si loo ciribtiro ama loo yareeyo saamaynta itaal darrida.

Naafonimada **lala kulmo marmar, ama sii yaraata** waxay ahaataa itaal darri haddii, marka ay ku jirto marxalad shaqeysa, itaal darridaan si muuqato u soo koobto hawl weyn oo la xariirta nolosha.

## Sidee Ayaan Fududeyn Ugu Helaa Cunugeyga?

Dugsiyada dadweynaha waa in ay fududeyn, qalab, iyo adeegyada ku habboon siiyaan ardayda xaqa u yeesha ee u baahan fududeyntaan si ay uga qeybgalaan, ugana fa'iideystaan waxbarashadooda. Tani waxaa ka mid ah dhamaan barnaamijyada iyo hawlaha uu kafaalo qaaday dugsiga, sida cayaaraha iyo safarada dibadda. Fududeyntaan, taakuleynta, qalabkaan, iyo adeegyada waxaa lagu sharaxaa qorshaha 504.

> Ardayda xaqa u yeelata qorshaha 504 **(1)** waxay qabaan itaal darrida jirka iyo madaxa taasoo si la taaban karo u soo koobta mid ama ka badan hawlaha waaweyn ee nolosha, waxayna u **(2)** baahan yahiin fududeyn, qalab, ama adeegyo—*maxaa yeelay waxay qabaan itaal darri* - si ay u helaan ugana fa'iideystaan waxbarashadooda.

Washington Office of Superintendent of PUBLIC INSTRUCTION

Si go'aan looga gaaro haddii ardayga u baahan yahay qorshaha 504, dugsiga waa in uu raaco saddaxdaan talaabo: tixraacin, isu keenidda kooxda 504, iyo qiimeyn.

**Walidiinta Waxay Leeyahiin Xuquuq Sida Hoos Timaado Qeybta 504**. Dugsiga waa in uu waalidiinta siiyo koobiga xuquuqdooda, ee lagu magacaabo *Ammaanka Hababka* (Procedural Safeguards), ka hor inta qofna uusan talaabada kowaad ka qaadin qiimeynta ardayga ama sameeynta qorshaha 504.

## 1. Codso Tixraaca Qiimenta

Qof kasta, oo ay ku jiraan waalidka ama ilaaliyaha, wuxuu ardayga u diri karaa qiimeyn. Waa in la qoro tixraaca Qeybta 504 iyo la weydiisto in dugsigu qiimeeyo haddii ardayga uu qabo itaal darri una baahan yahay fududeyn, qalab, iyo adeegyo iyo haddii kale. Dugsiyada waxaa saaran mas'uuliyad khaas ah in ay tixraaca Qeybta 504 u sameyaan arday kasta ay ogsoon yahiin ama ku tuhunsan yahiin in uu qabo itaal darri lagana yaabo in uu u baahan yahay fududeyn, qalab, ama adeegyo.

## 2. Dugsiga Wuxuu Isu Keenaa Kooxda 504

Baahida shakhsiga ardayga ayay ku xeran tahay qofka ka mid noqon doono kooxda 504. Waxaa jira saddax xubno muhiim ah oo ka tirsan kooxda 504:

- Qofka yaqaan ardayga - tusaale ahaan waalidka, macalinka, takhtarka, kalkaaliyaha, ama la-tlliyaha. Inkastoo waalidiinta aan laga rabin in ay ka mid noqdaan kooxda 504, ka qeybgalka waalidka wuxuu noqon karaa wax qiimo badan, si aan la maleysan karin.
- Qof daraasad ku samayn kara oo qiimeyn kara xogta qiimeynta.
- Qof aqoon u leh fursadaha ku meeleynta dugsiga.

Kooxda 504 waxay go'aan ka gaari doontaa haddii ardayga uu xaq u leeyahay kaddibna waxay go'aan ka gaari doontaa fududeynta, kaalmada, ama adeegyada loo baahan yahay in la helo si loo **yareeyo ama loo ciribtiro** saamaynta itaal darrida ardayga ku leedahay waxbarashadiisa/waxbarashadeeda.

## 3. 504 Qiimeynta Kooxda

Marka hore, kooxda 504 waxay soo aruurisaa iyo waxay baartaa xogta ku saabsan xaaladda ardayga. Xogta qiimeynta waa in ay ka timaado ilo kala duwan. In yar tusaalooyinka waxaa ka mid ah darajooyinka, buundooyinka imtixaanka, imaashada, booqashooyinka qolka caafimaadka, waxa waalidka iyo ardayga ku biiriyaan, aragtida macalinka, qiimeynta caafimaadka ama madaxa, xogta waxbarashada khaaska ah, iyo macluumaadka caafimaadka.

Kooxda 504 waa in ay soo aruuriso xogta ka jawaabta labadaan su'aalood:

1. Ardayga ma qabyaa itaal darrida jirka ama maskaxda oo si muuqata u soo koobta mid ama ka badan hawlaha waaweyn ee nolosha?
2. Haddii ay sidaas tahay, maxay yahiin fududeynta, qalabka, iyo adeegyada - haddii ay jiraan - uu ardayga u baahan yahay in uu helo kana fa'iideysto waxbarashada?

Dugsiga waa in uu **ogolaasho ka haysto waalidka ama ilaaliyaha** ka hor inta qiimeynta aysan bilaabanin. Haddii aan ogolaasho la haysanin, kooxda 504 ma qiimeyn karto arday ama ma sii wadi karto habka 504.

Waxaa jira saddax fikrad muhiim ah oo loo baahan yahay in waalidiinta fahmaan kuna saabsan baarista caafimaadka:

- Dugsiga kama rabo waalidka in uu fulliyo baarista caafimaadka si loo qiimeeyo ardayga. Hase ahatee, baarista waxay bixin kartaa macluumaad aad waxtar u leh kooxda 504.
- Dugsiga waa in uu codsado qiimeynta caafimaadka, kharashkana aan laga qaadin waalidka, haddii kooxda 504 u baahan tahay macluumaadka caafimaadka si ay u gaarto go'aan.
- Macnaha baarista caafimaadka ma aha in ardayga mar kasta u baahan yahay qorshaha 504. Takhaatiirta ma *qori karaan* qorshaha 504 - kooxda 504 oo keliya ayaa gaari karta go'aankaas. Hase ahatee, kooxda 504 waa in ay tixgeliso macluumaadka takhtarka bixiyo marka uu qiimeeynaayo ardayga.

## 4. 504 Kooxda Ayaa Abuurta Qorshaha. Dugsiga Ayaa Hirgeliya Qorshaha.

Haddii qiimeynta tilmaanto in *ardayga uu qabo itaal darrida jirka ama madaxa taasoo si muuqata u saameysa mid ama ka badan hawlaha waaweyn ee nolosha*, kooxda ayaa go'aan ka gaarta haddii ardayga u baahan yahay ama haddii uusan u baahneyn qorshaha 504.

Qorshaha wuxuu sharaxaa fududeynta, qalabka, iyo adeegyada loo baahan yahay in dugsiga uu bixiyo si loo hubiyo in ardayga uu la kulmi karo waxbarasho madax banaan oo ku haboon dadweynaha, sida sharciga uu rabo.

Dugsiga waa in uu **ogolaasho ka haysto waalidka ama ilaaliyaha** ka hor inta shaqaalaha aysan talaabo ka qaadin qorshaha 504. Waqtigaan, dugsiyada waa in ay waalidiinta siiyaan koobiga *Qeybta 504 Ammaanka Hababka*.

Marka la meeleeyo qorshaha 504, dhamaan xubnaha shaqaalaha dugsiga waxay raacaan qorshaha si loogu fududeeyo ardayga. Dugsiga ayaa mas'uul ka ah - ee ma aha ardayga ama waalidiinta - in uu hubsado in macalimiinta la socdaan adeegyada, qalabka, ama fududeynta qorshaha.

Macalimiinta waa in ay la tashtaan **iskuduwaha Qeybta 504** ee dagmada haddii ay u baahdaan kaalmo ama caddeyn ku saabsan waxa loo baahan yahay in loo sameeyo ardayga.

## 5. Dugsiga Wuxuu Fiiriyaa iyo Wuxuu Qiimeeyaa Qorshaha 504

Sannad kasta, dugsiga waa in uu fiiriyo qorshaha 504 si loo hubsado in ay sii socoto wax ka qabashada baahida ardayga. Hase ahatee, waalidka ama macalinka wuxuu waqti kasta weydiisan karaa dib u fiirin haddii ay la tahay in qorshaha uusan la kulmin baahida ardayga.

Waqti ka waqti, kooxda 504 waa in ay dib u qiimeyso xaq u yeelashada ardayga Qeybta 504 iyo fududeynta, qalabka, ama adeegyada ku jira qorshaha 504. Dib u qiimeyntaan waa in la fulliyo ugu yaraan hal mar saddaxdii sanno, hase ahatee waxaa la qaban karaa in kale oo badan; waxay ku xeran tahay baahida ardayga.

### Edbinta iyo Qeybta 504

Ka hor inta dugsiga uusan edbin ku qaadin ardayga qaba itaal darrida, khaas ahaan haddii ay ku lug leedahay ka-joojin ama ka-saarid, dugsiga waa in uu go'aan ka gaaro haddii ay jirto baahi in la qabto shir khaas ah oo lagu magacaabo *ogaashada waxa soo baxa*. Shirkaan, kooxda 504 waxay go'aan ku gaartay haddii uu jiro

xariir ka dhexeeyo itaal darrida ardayga ama qorshaha 504 iyo haddii kale, iyo dabeecadda ardayga tahay midda u horseeday falka edbinta.

Kooxda 504 waa in ay qabtaan shirka lagu go'aamiyo waxa jira ka hor inta aan ardayga itaalka darran laga joojinin ama laga saarin:

- In ka badan **toban** maalin dugsiyeed **isku xiga**, **AMA**
- In ka badan **iskudarka toban maalin dugsiyeed** muddo hal sanno dugsiyeed, taasoo muujin karta *sasaanka ka-saaridda*.

Waxaa jira labo su'aal oo loo baahan yahay in kooxda 504 ka jawaabto marka la qabto shirka go'aanka muujinta:

1. Dabeecaddaan ma waxaa ka dambeeya, ama ma waxay xariir toosan oo muuqda la leedahay, itaal darrida ardayga?
2. Dabeecaddaan ma waxay toos uga dhallatay marka dugsiga ku guul dareystay in uu raaco qorshaha Qeybta 504 ee ardayga?

Haddii **jawaabta tahay haa** mid ka mid ah su'aasha, dabeecadda waxay muujisaa itaal darrida ardayga kaddibna ardayga wuxuu joogi karaa dugsiga. Kooxda 504 waa in ay fiiriso qorshaha 504 ee ardayga kaddibna baddasho haddii loo baahdo.

Haddii **jawaabta labada su'aal tahay maya**, dugsiga wuxuu edbin ku qaadi karaa ardayga isla sida edbinta loogu qaado ardayga aan qabin itaal darri.

## Kadeedka Takoorka

Kadeedka ku saleysan itaal darrida waa qaab takoor laga mamnuucay dugsiyada Washington. Dugsiyada waa in ay qaadaan talaabooyin oo ardayda looga badbaadiyo kadeedka takoorka.

Shaqaalaha dugsiga waa in ay baaraan kadeedka takoorka suurtogalka ah - isla marka ay ogadaan, ama ay ogaan karaan - xattaa haddii waalidka ama ardayga uusan soo gudbinin ashtako rasmi ah.

Haddii baaritaanka muujiyo in dabeecadda kadeedka abuurtay jawi ku dhisan cadaawad, shaqaalaha waa in ay dhakhso joojiyaan dabeecadda iyo soo af jaraan jawiga ku dhisan cadaawadda.

Dugsiga waa in uu:

1. Wax ka qabto waxyeelada kadeedka takoorka ku yeeshay ardayga inta uu ku sugnaa dugsiga, **IYO**
2. Hubsado in dabeecadda takoorka aysan mar kale dhicin.

Ka fiiri macluumaad dheeraada oo ku saabsan kadeedka takoorka, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariira, https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights.

## Xallinta Dhibatooyinka ama Qilaafaadka

Inta badan, wada hadalada lala yeesho maamulaha dugsigaada, ama iskuduwaha Qeybta 504 ee ku sugan dugsiga dagmada, ayaa ah talaabada kowaad ee ugu fiican si wax looga qabto arrimahaada ama qilaafaadka ku saabsan takoorka iyo shaqada ku wajahan xalka.

- **Ahamiyadda sii xaqiiqada** la xariirta takoorka iyo kadeedka, sida aad u fahamsan tahay, IYO
- Ogeysii maamulaha ama iskuduwaha **waxa aad rabtid in ay sameyaan si ay u xalliyaan dhibaatadaas**

Waxaad macluumaadka lagala xariiro iskuduwaha Qeybta 504 ee dagmada ka heli kartaa halkaan, https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/school-district-charter-school-compliance-coordinators. Waxaad kaloo fursad u haysataa in aad soo gudbisid ashtako rasmi ah.

## Formal Complaints — Discrimination and Discriminatory Harassment
### Ashtakooyinka Rasmiga - Takoorka iyo Kadeedka Takoorka

Haddii aad aaminsan tahay in dugsiga uusan raacin qorshaha Qeybta 504 ee cunugaada ama cunugaada uu la kulmo takoor ama kadeed, waxaad soo gudbin kartaa ashtako rasmi ah.

- Bogga **Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights)**, https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/complaints-about-discrimination, waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo ashtako rasmi ah iyo sida loo raaco talaabadaha.
- Kala xariir U.S. Waaxda Waxbarashada (Department of Education), **Xafiiska Xuquuqda Aadanaha (Office for Civil Rights),** telefoonka 206-607-1600 (TDD: 1-800-877-8339), ama booqo bogga internetka, www.ed.gov/ocr.
- Kala xariir **Guddiga Xuquuqda Aadanaha Gobolka Washington (Washington State Human Rights Commission)**, telefoonka 1-800-233-3247 (TTY: 1-800-300-7525), ama booqo bogga internetka**,** www.hum.wa.gov.

### Ka baro in badan. Weydii su'aalo. Raadso kaalmo.

**Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga (Equity and Civil Rights) ee Xafiiska Agaasimaha Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction)**

360-725-6162 | TTY: 360-664-3631 | equity@k12.wa.us | https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights

Si aad u heshid **Iskuduwaha Qeybta 504 ee dugsiga dagmadaada, booqo:** https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/school-district-charter-school-compliance-coordinators

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan takoorka iyo kadeedka ku saleysan itaal darrida, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariira, ka heli doontaa, https://www.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights

Warqadaan waxay soo taxday xuquuqda iyo mas'uuliyadda sida hoos timaado sharciyada xuquuqda madaniga gobolka iyo federaalka. Waxaa dhici karto in aad yeelatid xuquuq dheeraad ah sida hoos timaado sharciyada kale. Ujeedada macluumaadkaan waa wargelin oo keliya - ma ay bixinayaan tallo sharci ah. Wixii talooyin sharciga oo u qaasa daruuftaada xaalada shakhsinimo, fadlan kala xariir qareen.

OSPI ayaa u siisa marin siman dhamaan barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo aan ku saleysnayn dheddig/lab ahaan, sinji, caqiido, diin, midab, asal waddan, da'da, kuwa si sharaf leh looga sii daayay ciidamada ama heerka ciidamada, Dookh Isku-tag, oo ka mid yihiin muujinta ama isku-aragga lab/dheddig, jiritaan kasta oo naafanimo dareen dhimir ama jirka ah, ama isticmaalka hage ey tababbaran ama u adeegga xayawaanka ee qofka naafanim,ada qaba. Su'aalaha iyo cabashooyinka taakoorka la sheeganayo ayaa lagu hagaajin karaa the Equity and Civil Rights Director, (360) 725-6162 or P.O. Box 47200; Olympia, WA 98504.

Last update: September 2024

Last update: September 2024